

Application for Provider Supports Subcommittee

DCYF waxay Aqbashaa Arjiyada Gudi Hoosaadka Taageerooyinka Bixiyaha ee Golaha Latalinta Waxbarashada Hore

The Washington State Department of Children, Youth, and Families (DCYF) waxay xubin shaqaalaysiinta ka tahay Gudi Hoosaadka Taageerada Bixiyaha ee Golaha Latalinta Waxbarashada Hore (Provider Supports Subcommittee of the Early Learning Advisory Council, ELAC). Wuxuu wakhtii xaadirkan shaqaalaysiinaynaa shakhsiyadka doonaya ee u qalma ee leh khibrada nidaamka daryeelka ilmaha Gobolka Washington. Wakiilada waxaa kamid ah:

- Bixiyaha Daryeelka Ilmaha Guriga ee Qoyska
- Bixiyayaasha Xarunta Daryeelka Ilmaha
- Bixiyayaasha Daryeelka Ilmaha ee Banaanka Ku Shaqeeya
- Bixiyayaasha Caruurta Da'da Waxbarasho
- Bixiyayaasha Qoyska, Asxaabta, iyo Jaarka (Family, Friend, and Neighbor, FFN)
- Bixiyayaasha Barnaamijka Waxbarashada iyo Kaalmada Caruurnimada Hore (Early Childhood Education and Assistance Program, ECEAP)
- Dawladaha Qabaa'ilka
- Qandaraaslayaasha Kaalmada iyo Tobobarka Farsamo ee Barnaamijka Early Achievers
- Hay'adaha Ka Masuulka ah Qabashada Qiimaynta Barnaamijka Early Achievers

Macluumaadka Gudi Hoosaadka Taageerooyinka Bixiyaha

Gudi Hoosaadka Taageerooyinka Bixiyaha ee ELAC waxaa la sameeyay Janaayo 2020 iyaga oo ah gudi madax banaan si looga wada hadlo oo ay uga waramayaan dhamaan adeegyada ku xeeran bixiyayaasha waxbarashada hore, oo ay ku jiraan laakiin kuma koobna; siyaasada liisanka, isbedelka WAC, hay'adaha danayna xeerka, wixii ku saabsan maamulka, shuruucda kaabista/qiimaynta, khibrada jahwareerka, waxka qabadka iyo kahortaga, laxaad la'aanta hormarka, caafimaad qabka qoyska dhan, nidaamyada iyo qaababka Early Achievers, iwm.

Xubinimada

Xubnaha waxay kasoo kala jeedaan deegaanada Washington, qoomiyadaha, iyo dhaqanada kala duwan oo waxay xubin ka yihii sinaanta qoomiyada iyo tixgelinta dhaqanka iyo wakaalada turjubaanka kuwaas oo qayb muhiim ah ka ah shaqadooda.

Xubnaha waxay jagada hayaan laba sano oo waxay ku eeg tahay Juun 30 ee sanadka labaad. Gudi hoosaadka waxay kulmaan ugu yaraan lix jeer sanadkii; guud ahaan, laga bilaabo 9 subaxnimo ilaa 3 galabnimo. Xubnaha waxaa looga fadhiyaa inay yimaadaan badanaa kulamada oo ay diyaar u noqdaan ka qayb gal firficoon. Ka qayb galku waa u ikhityaar gudi hoosaadka dheeraadka ah ama kooxaha shaqada ee laga filan karo kulmada ka baxsan taariikhaha kulmada caadiga ah.

Xubnaha gudi hoosaadka waxay u qalmaan in loo gudo kharashka safarka (*marka uu dib u bilaabmo kulanka foolka-foolka ah*) si gacan looga gaysto ka qayb galka. Gudista kharashka safarku waxay ku salaysnaan doontaa xadiga gudista ee gobolka oo waxay waafaqsan tahay Shuruucda Socdaalka ee Xafiiska Maamulida Dhaqaale ee Gobolka Washington. Xadiga wakhtiga ee socdaalka waxaa laga heli karaa:

<http://www.ofm.wa.gov/policy/10.90.htm#10.90.10>.

Nidaamka iyo Wakhtiga

Juun 30, 2023:	Wakhtiga Arjigu Ku Eeg Yahay
Julaay 17, 2023:	Naqdinta Arjiyada
Julaay 24, 2023:	Wargelinta Dalbadayaasha
Agoosto 2023:	Shuruudaha Xubantu waxay bilaabi doontaa
Agoosto 09, 2023:	Kulanka Kowaad ee Xubnaha Markaa La Magaabay

Su'aalo Dheeraad ah

Waxa aanu kugu soo dhawaynaynaa inaad ka jawaabto su'aalo qaab kaa caawin kara inaad si wanaagsan naftaada usoo bandhigto. Waxaa kamid noqon kara jawaabo qoraal ah, fiidyaw (YouTube), gudbin elektoroonig ah, ama wada hadal taleefanka ah. Hadii aad doonayso inaad qabsato balan taleefanka ah oo aad kaga hadlayso su'aalo, fadlan nagala soo xidhiidh dcyf.communityengagement@dcyf.wa.gov ugu danbayn Juun 19, 2023. Hadii kale, fadlan buuxi su'aalaha oo waxa aad usoo gudbisaa mid kamid ah qaababka soo socda **ugu danbayn Juun 30, 2023**:

Iimeel: dcyf.communityengagement@dcyf.wa.gov	Elektoroonig ahaan: SurveyMonkey
--	--

Waxa aad nagala soo xidhiidhi kartaa (dcyf.communityengagement@dcyf.wa.gov) with any questions.

Dhamaan macluumaadka hoos lagu sheego waxa loo isticmaali doonaa ka shaqaynta shaqaalaysiintan. Waad ku mahadsan tahay inaad buuxiso.

Magaca:

Magaalada:

Ganacsiga/Hay'adaha:

Lambarka Taleefanka:

Qaabka ugu wanaagsan ee aanu kuula soo xidhiidhi karno?

Cinwaanka Iimeelka:

Qoomiyada iyo Isirka (Ikhtiyaar):

- 1. Maxaad u doonaysaa inaad u noqoto wakiil gudi hoosaadka Taageerada Bixiyaha?**
- 2. Waa maxay aaga aad khibrada u leedahay ee aad ku matalayso ee aad kooxda kusoo kordhinayso?**

- | | |
|--|--|
| <input type="checkbox"/> Daryeel ka Qoyska, Asxaabta iyo Jaarka | <input type="checkbox"/> Early Achievers |
| <input type="checkbox"/> Laxaad La'aanta Korniinka | <input type="checkbox"/> Daryeel ka Jahwareerka Laga Warqabo |
| <input type="checkbox"/> Taageerada Hore ee Sabiyada iyo Socod Baradka
(Early Support for Infants and Toddlers, ESIT) | <input type="checkbox"/> Daryeel ka Ilmaha Xiliyeedka ah |
| <input type="checkbox"/> Adeegyada Waxka Qabadka iyo Kahortaga
Caruunimada Hore (Early Childhood Intervention
and Prevention Services, ECLIPSE/MTCC) | <input type="checkbox"/> Caafimaadka Maskaxda ee Sa biga iyo
Caruurnimada Hore |
| <input type="checkbox"/> Kaabista | <input type="checkbox"/> Xarunta Daryeel ka Ilmaha |
| <input type="checkbox"/> Barnamijyada Daryeelka Ilmaha ee Banaanka | <input type="checkbox"/> Barnamijyada Caruurta Da'da Waxbarasho |
| <input type="checkbox"/> Head Start/Early Head Start | <input type="checkbox"/> Daryeel ka Ilmaha Guriga Qoyska |
| <input type="checkbox"/> Tribal ECEAP | <input type="checkbox"/> Kaydka Dugsiga Xanaanada Washington ee
Xirfadaha Hormarka (Washington
Kindergarten Inventory of Developing Skills,
WaKIDS) |
| <input type="checkbox"/> Kaalmada iyo Waxbarahada Caruurnimada Hore
Barnaamijka (ECEAP) | <input type="checkbox"/> Prenatal to Three Services |
| <input type="checkbox"/> Waxkale: _____ | |

- 3. Waa maxay aragtidaada ama qaabka aad u bixinayso fursado waxbarasho oo hore ee Gobolka Washington?**
- 4. Saamayn nooce ah ayaad rajaynaysaa inaad ku aragto gudi hoosaadka waxbarashada hore ee Washington, oo sidee ayaad doonaysaa inaad dadaalka uga qayb qaadato?**
- 5. Sidee ayaad u maqashay bayaankan iyo/ama yaa kuu soo gudbiyay?**
- 6. Fadlan noo sheeg wixii kale ee aad doonayso inaad nala wadaagto ee adiga kugu saabsan, khibradaada iyo sababta aad u aragto inaad u noqonayso wakiil wanaagsan oo nidaamka daryeelka ilmaha ee Washington ah.**

